Ohio Statewide
Family Engagement Center
at The Ohio State University

# Ka Caawinta Ilmahaaga in uu Barto Wax ku saabsan

Waalidiinta ayaa **door weyn** ka ciyaaraan sida ilmahooda u maamulaan lacagta inta ay nool yihiin. Xilliga ilmahaagu uu korayo, ayaa ah wakhtiga ku haboon oo aad ilmahaaga ku bari karto wax ku saabsan lacagta ama aad kala hadasho wax ku saabsan sida ay u maarayn karaan isticmaalka lacagta. Xitaa haddii aysan ula qasdin, waalidiintu ayaa had iyo jeer carruurtooda baraan waxyaabaha muhiimka ah ee ku saabsan lacagta. Markaa, waa fikrad wanaagsan inaad ku dadaasho ka caawinta ilmahaaga inuu barto wax ku saabsan maaraynta lacagta xilliga uu korayo.

Xusuusnow qasab ma aha inaad tahay khabiir dhanka dhaqaalaha ah. Waxaad akhrin kartaa macluumaadkan si aad u ogaato siyaabaha aad uga caawin karto ilmahaaga inuu wax ka barto arrimaha la xidiidha lacagta.

## Sidee caruurtu ku bartaan wax ku saabsan lacagta?

Carruurta iyo dhallanyarada waxay ku bartaan wax ku saabsan lacagta iyaga oo:

- Eegaya sida waalidkood u maareeyaan lacagtooda ama u sameeyaan go'aamada ku aadan lacagta.
- Maqalaaya sida waalidkood ama dadka kale uga hadlaan lacagta.
- Kala hadlaya waalidkood iyo qoyskooda wax ku saabsan lacagta.
- Dugsiga, ama ilo kale ka baranaaya wax ku saabsan lacagta.

## Sideen uga caawiyaa ilmahayga inuu barto wax ku saabsan lacagta?

Adiga ayaa go'aaminaya sida iyo waxa aad bartid ilmahaaga ee ku aadan lacagta. Laakiin, waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo kala hadlaayo mowduucyo ay ka mid yihiin qondaynta, kaydinta, iyo kharash-garaynta waxtarka leh. Waxaad ku dhiirigelin kartaa ilmahaaga inay ka fikiraan yoolkooda dhaqaale iyo sida ay u gaadhi karaan yoolalkaas. Waxaa sidoo kale la wadaagi kartaa hadafyada iyo yoolallka aad u raajaynayso ilmahaaga marka ay bilaabaan inay helaan lacagtooda gaarka ah. Waxa kale oo loo baahan yahay in aad u diyaariso ilmahaaga in uu sameeyo go'aamo dhaqaale markay isu diyaarinayaan mustaqbalka. Mararka qaarkood, la wadaagista waayo-aragnimaada nololeed ee ku aadan lacagta ayaa sidoo kale waxtar yeelan kara!

Waxaa laga yaabaa inaadan garanayn dhammaan jawaabaha loo baahan yahay marka ay timaado arrimaha lacagta. **Taasi waa wax caadi ah!** Habka ugu wanaagsan ee lagu bilaabo waa adiga oo siinaya ilmahaaga fursad uu kala hadlo lacagta oo uu su'aalo ku weydiiyo. Sidoo kale waa muhiim in ilmahaagu helo khubaro la-talin maaliyadeed oo la

*Waxaa ilahan diyaariyay Xarunta Ka-qaybgalka Qoyska ee Gobolka Ohio Wixii ilo dheeraad ah oo taageeraya ka qaybgalka qoyska ee arrimaha waxbarashada, booqo ohiofamiliesengage.osu.edu.*

isku halayn karo ama ilo macluumaad oo muhiim ah. Onlaynka ayaa laga yaaba in aad ka hesho ilahaas ama xitaa bulshadaada dhaxdeeda. Sidoo kale waxaad samayn karta wax akhris iyo baaritaan si aad fikrado u hesho.

## Waa kuwan tusaalayaal ka mid ah:

1. Ka caawi ilmahaaga inuu barto xirfadda maareynta lacagta. Tusaale ahaan, waxaad u furi kartaa ilmahaaga akoon kayd ah oo aad ka caawin kartaa inay bartaan inay u isticmaalaan si ay u kaydiyaan lacagta ay helaan.
2. Ka Caawinta Ilmahaaga in uu barto Wax ku saabsan Lacagta. Waxaad ku dhiirigelin kartaa in ay akhriyaan buugagta, ama ilaha onlaynka ee muhiimka ah. Waxaad sido kale ka qaybgelin kartaa hawlaha lacagta si ay wax kaaga bartaan.
3. Tusi ilmahaaga sida aad lacagtaada u maarayso. Tusaale ahaan, waxaad tusi kartaa sida aad lacagta u kaydsato ama sida aad u go'aansato waxaad iibsanayso marka aad soo dukaamaysanayso.
4. La wadaag waayo-aragnimadaada nololeed ee ku aadan lacagta. La wadaag wax walbo oo ku habboon iyaga. Waxaad kala hadli kartaa waayo-aragnimada wanaagsan iyo kuwa adag oo aad soo martay.
5. Haddii aad ku qanacsantahay, waxaad ilmahaaga ka qaybgelin kartaa marka aad samaynayso go'aannada maaliyadeed. Qasab ma ah inaad la wadaagto macluumaadka oo dhan. Laakin, waxaad u sheegi kartaa sababta ama sida aad go'aanka u samaysay. Waxaad kala hadli kartaa fikradaha lacagta, sida ay mararka qaarkood u fiican tahay inaad iibsato waxyaabaha lagama maarmaanka ah ka hor inta aadan lacag ku bixin waxyaabaha aad rabto laakiin aadan baahi badan u qabin.

## Sideen ku bilaabaa inaan ilmahayga kala hadlo wax ku saabsan lacagta?

Carruurtu waxay wax ku saabsan lacagat ka bartaan wada-hadal ay la yeeshaan dadka kale. Waxaad kala hadli kartaa ilmahaaga ama waxaad ka faa'iidaysan kartaa wakhtiyada ilmahaagu ku weydiiyaan lacagta si aad wax badan ugu fahansiiso. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in ilmahaagu ku weydiiyo inaad wax u soo iibiso iyaga ama ay ku waydiiyaan mawduuc ku saabsan dhaqaalaha. Ka faa'iidayso fursadahan oo kala hadal iyaga wax ku saabsan lacagta. Kaliya cashar un ha barin ilmahaaga oo taas beddelkeeda hubi in ay ficil sameeyaan oo ay qayb ka noqdaan wada-hadalka oo ay su'aalo ku weydiiyaan. Isku day in aad wada hadal furan la yeelato ilmahaagu oo ha kula wadaagaan fikradahooda, su'aalahooda, iyo dareenkooda.

## Waa kuwan tusaalayaal ka mid ah:

1. Marka ilmahaagu kaa codsadaan inaad wax u soo iibiso iyaga waxaad odhan kartaa: “Mararka qaarkood waan la yaabaa in aad taqaano qiimaha ay leedahay lacagta marka aad lacag i weydiisato. Maxaad u malaynaysaa qiimaha iibsashada shaygan?

2. Haddii aad qorshaysay kharashkaaga, maxaad ku dari lahayd?

3. Ma xasuusan kartaa wakhti aad lacag ku bixisay shay oo aad gadaal dambe ka shallaaysay? Maxaadan u faraxsanayn? Maxaa ka duwan oo aad samayn lahayd?

4. Waa maxay shay aad jeceshahay inaad lacag u kaydsato si aad u soo iibsato? Maxaad samayn kartaa si aad u xaqiijiso inaad kaydsato lacag kugu filan?

5. Waa maxay yoolkaada dhaqaale ee adiga kugu muhiimsan? Maxaad samayn kartaa si aad u gaadho yoolkan?

6. Waxaan jeclaan lahaa inaan la wadaago qaar ka mid ah waayo-aragnimadayda gaarka ah ee ku saabsan guulaheyga dhaqaale iyo khaladaadka aan wajahay. Waxa laga yaabaa in waayo-aragnimadayda ay kaa caawiso inaad wax ka barato markaad go'aannadaada dhaqaale samaynayso.

## Illaha Onlaynka ee Bilaashka ah

- **Wadahadalada Lacagta** - waa taxane gaaban oo onlayn ah oo ku saabsan inaad wax ku saabsan lacagta kala hadasho ilmahaaga dugsiga dhexe ama sare. Waxay ka kooban tahay shan mawduuc oo ka hadlaaya lacagta.
  Booqo go.osu.edu/moneytalksresource

- **Markaad Korto Lacagta** - waxaad ka hadli kartaa hawlaha iyo macluumaadka aad u isticmaali karto si aad uga caawiso ilmahaaga inay kobciyaan xirfadahooda lacagta inta ay ku jiraan marxalad kasta oo noloshooda ah.
  Booqo consumerfinance.gov

- **Lacagtaada, Qalabka Yoolalkaaga** - qalabka aad wax badan uga baran karto wax ku saabsan lacagta oo aad uga fikirto habka isticmaalka dhaqaalahaaga. Waxaad ku heli kartaa luuqadaha Ingiriisiga, Isbaanishka, iyo Shiineska
  Booqo consumerfinance.gov

*Waxaa ilahan diyaariyay Xarunta Ka-qaybgalka Qoyska ee Gobolka Ohio Wixii ilo dheeraad ah oo taageeraya ka qaybgalka qoyska ee arrimaha waxbarashada, booqo ohiofamiliesengage.osu.edu.*